Gabagabada Kulannaddii Culumada ee ku saabsanaa Shirkaddii Qaran Express

03/Ramadaan 1433h- 22 julay 2012

الحمد لله والصلاة والسلام على رسول الله صلى الله عليه وآله وصحبه وسلم، أما بعد:

Waxaa magaalada Nairobi noogu yimid qayb ka mid ah Milkiilayaashii iyo Maamulkii guud (Board of Directors) ee Shirkaddii Qaran,kuwaas oo ka koobnaa guud ahaann 12 Ruux, waxayna naga Codsadeen in aan Culumo ahaan wxii Allaah naga garansiiyo Sharci ahaan aannu ka niraahno Arrinta ku dhacday Shirkaddii Qaran Express, anaguna waan Aqbalnay Codsigaas, maadaama ay waajib nagu tahay in Hantidaa Ummadda haddii wax uun laga badbaadinkaro in laga badbaadiyio, sidaa darted ayaan kulamo la xiriira Arrintaas kala yeelanay Milkilayaashii iyo Maamulkii Shirkadda qayb ka mid ah, gaar ahaan Raggii noogu yimid Nairobi taariikhdu markay ahayd 08-13 April 2012, waxaanan la kulannay Xubnaha kala ah:

1. Cabdulqaadir Xaashi Jamaali (Gudd.Shirkadda)
2. Khaliifa Axmed Sheekh Xuseen (Gudd. Ku Xigeen)
3. Axmed Ismaaciil Xuseen (gaane) (Xubin)
4. C/rashhid Maxamed Muuse (Xubin)

Kulankaas oo ay Gunaanadkiisii Culumadu ka soo saareen Talooyin guud oo Sharci ah kuwaas o ku wajahnaa Milkiilayaashii, Maamulkii, Wakiilladii, iyo guud ahaan Shaqaalahii Shirkadda Qaran.

Ka dibna Culumadu waxay ka dalbeen Maxamed bile oo ah xisaabiye madax bannaan inuu xisaabxir ku sameeyo Shirkaddii Qaran Express, taas oo uu ku dhaqaaqay soona gabagabeeyey 15 may 2012.

Sidoo kale waxay Culumada oo uu wehliyo Xisaabiye Maxamed Bile kula yeesheen kulanno labaad oo kala duwan Magaalada Dubai ee Waddanka

22/07/2012

1

22/07/2012

Generated by CamScanner

Imaaraadka Carabta (UAE) taariikhdu markii ay hayd 12—17 Julay 2012, inta badan Maamulkii iyo Milkiilayaashii Shirkaddii Qaran,si ay uga gungaaraan Arrimaha Shirkadda Qaran Express, waxayna qaadeen tallabooyinka soo socdo:

1. Dhageysi iyo Xogwareysi ay la sameyeen Xubnihii Milkiilayaasha Shirkaddii Qaran Express, Gaar ahaan saxiixayaashii Heshiiskii 28 Novembar 2008, iyo kii ugu danbeeyey ee 15 June 2010 intoodii badnayd, waxaana ka mid ah Xubnihii aan la kulannay:

- Cabdulqaadir Xaashi Jamaali (Gudd.Shirkadda)
- Khaliifa Axmed Sheekh Xuseen (Gudd. Ku Xigeen)
- Axmed Ismaaciil Xuseen (Gaane) (Xubin)
- C/rashhid Maxamed Muuse (Xubin)
- Xuseen Aw-yuusuf Xasan (Xubin)
- Cabdulcasiis Cali Ciid (Xubin)
- Xuseen Axmed Xasan (Goley) (Xubin)
- Cabdulkariim Sheekh Yuusuf (Xubin)
- Cismaan Sheekh maxamuud (Xubin)

Waxaa kale oo aan Telefoonka kula xiriirnay taariikhdu markay ahayd 14 Julay 2012 laakiin naga Cudurdaartay in uu kulammada nagala so qeyb galo:

- Cabdulraxmaan Maxamed aadan oo ah Xubin ka mid ah (Board of Directors) isla markaana jogay Somali land oo aannu kala xiriirnay galabnimadii ay bishu ahayd 14 Julay 2012.

2. Waxaa kale oo aan magaalada Dubai kula kulannay qayb ka mid ah Guddigii fulinta ee Shirkaddii Qaran Express ee iyagu si toos ah ula falgalayay Shaqada Shirkadda, gaar ahaan:

- Maxamed Cartan Rooble (Maareeye)
- Cadulraaxmaan Maxamed Madoobe (Madaxii Xisaabaadka)

3. Waxaan dhageysannay Warbixin Maaliyadeeddii uu soo diyaariyay Xisaabiye Maxamed Bile ee taabanaysay Xaaladda maaliyadeed ee Shirkadda Qaran.

22/07/2012

22/07/2012

Generated by CamScanner

Gabagabadii waxaa inoo soo baxay Arrimaha soo socdo:

1. In hantidii Shirkadda Qaran Expess ay u kala baxday sida soocoto:
   A. Qayb ah khasaare cad oo saamaynaya Dhammaan Saamiyada Shirkadda si Bqolley ah.
   B. Qayb Ku maqan wakiillada Shirkadda iyo Qeyb Milkilayaasha ka mid ah, oo u baahan in la doono oo la soo uruuriyo.
   C. Qayb U baahan xaqiijin Sharci ah sida lagu dhacay ama ay ku luntay, si markaa loo ogaado halka ay marto, iyo Khaanadda ay gasho.
   D. Qayb la isku haysto Wakiillada iyo Maamulka oo u baahan in lugu kala garbaxo Sharecada Islaamka.
   E. Qayb hanti maguurto ah oo hadda taalla una baahan in la qiimeeeyo dabadeed la iibiyo loona qaybiyo dadkii ay wax ka maqnaayeen.
2. Haddaba si Arrimahaas oo dhan wax looga qabto, oo loo daba galo hantida maqan, loo xifdiyo kuwa hadda gacanta ku jira, wixii la soo helana loogu celiyo Dadkii ay wax ka maqanaayeen si caddaalad ah, waxaa daruuri ama lama huraan noqotay in la sameeyo Guddi u istaaga Arrintaas, kana koobani Siddeed Xubnood oo isugu jira Milkilayaal iyo saamilay, waxyna kala yihiin:

A. C/kariim Sheekh yuusuf	Guuddoomiye
B. C/raxmaan Maxamed Aadan	Ku xigeen
C. C/qadir xaashi Jamaali	Xubin
D. Axmed Ismaaciil Xuseen (gaane)	Xubin
E. C/rashid Maxamed Muuse	Xubin
F. Mustafa aw aadan ama C/hi Jaamac	Xubin
G. C/ladhiif yuusuf Barre	Xubin
H. C/casiis Cali Jimaale	Xubin

3. Raggaan la tillmaamay ee ah Guddiga waa ragga hawsha wadaya, laakiin Xilka iyo mas'uuliyddu waxa ay wada saarantahay Dhammaan Milkiilayaashii Shirkadda Qaran, qof walbaana waxii looga baahdo amaba uu qaban karo waa in uu u gutaa si Daacadnimo iyo Allaah ka cabsi leh.
4. Guudigaas Howshoodu waxay tahay:

22/07/2012

22/07/2012

Generated by CamScanner

A. In ay u istaagaan raadinta iyo soo ururinta hantidii Shirkadda ka maqanayd.
B. Guddigani wax ay kaashan karaan cid kasta oo ay u arkaan in ay wax ka tari karto howsha loo xilsaaray.
C. Samaynta Accounts ay ku qoranyihiin ugu yaraan saddax ruux oo guddiga ka mid ah, kuna soo ururiyaan Hantida maqan, ka saaridda Hantida Account'igaasna ay u sameystaan saxiix wadajir ah.
D. In ay Qiimeeyaan isla markaana iibiyaan hantida nool ee Shirkaddii u baaqiga ah.
E. In ay la socodsiiyaan Guddiga Culumada hadba meesha ay wax u marayaan, si talo bixin looga siiyo.
F. In ay sameysataan Qorshe cad oo ay ku howlgalaan, ayadoo loo eegayo hadba ruux walbaa meesha uu ku habboonyahay.
G. Inay u qeybiyaan hadba wixii hanti ah ee gacantooda soo galo dadkii Xuquuqda lahaa, ayagoo la kaashanayo Guddiga Culumada.

5. Guddigan Muddada ay shaqeynayaan waa lix bilood wajiga hore si loo qiimeeyo waxqabadkooda, dabadeed waxaa la isugu imanyaa shir guud oo ay Culumaduna Goobjoog ka tahay, halkaas oo lagu qiimeyn doono waxa qabsoomay iyo waxa dhiman, kadibna laga sii ambaqaadi doono haddii allaah idmo.
6. Hantida soo noqota waxaa marka dadka xaqa Shirkadda ku leh loo celinayo Mudnaanta leh:
    - Wixii Ammaanooyin ama Deymo ah ee Shirkadda lagu lahaa.
    - Kadib waxa soo hara waxaa leh Saamilayda Shirkadda si siman, waxaaana loogu qeybinayaa nidaamka Boqoleyda.

Gunaanad

Guddigeennan Culumada ah intaa aan kor ku soo sheegnay ee ah dhibaatada dhacday, nooceeda, halka ay ka timid, Cidda mas'uulka ka ah iyo xalkeedaba, waa intii aannu kari karaynay ee ahayd awooddeenna, waxii intaa ka danbeeyana

22/07/2012

22/07/2012

Generated by CamScanner

waxa ay u taallaa jihooyinka aan soo tilmaannay in ay saarantahay Mas'uuliyadda Arrintan.

Waxaan Allaah ka baryaynaa in uu walaalaha ku garabgalo u istaagidda Badbaadinta hantidaa umadda iyo Dabagalkeedaba, waafajiyana inay si xaq ah ku qeybiyaan wixii gacantooda soo gala ama hadda ku jira.

Saxiixa Guddiga Culumada

1. Sheekh Maxamed Cabdi Ummal 22/07/2012

2. Sheekh C/risaaq Aadan macallim 22/07/2012

Generated by CamScanner